WASAARADDA QORSHEYNTA MAALGASHIGA & HORUMARINTA DHAQAALAHA

وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية

MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND ECONOMIC DEVELOPMENT

# WARBIXINTA BILLAHA

## LUULYO 2025



## HORDHAC

**Luulyo 2025** waxay ahayd bil aad loo xoojiyey iskaashiga bahwadaagta, dardargelinta nidaamyada Kormeerka & Qiimeynta (K&Q), iyo dhiirrigelinta maalgashi la jaanqaada mudnaanta qaranka. Dowladda Federaalka iyo Qaramada Midoobay waxay si qoto dheer uga wada hadleen jihaynta iskaashiga 2026–2030, iyagoo dib u eegay hirgelinta Qorshaha Iskaashiga ee 2021–2025. Wasaaraddu waxay soo bandhigtay e-NIMIS—aalad casri ah oo xoojinaysa xog-ururinta iyo kormeerka waxqabadka intii lagu guda jiray shirka Guddi-hoosaadka Tiirka Horumarinta Arrimaha Bulshada.

Dhanka kor u qaadista aqoonta dhaqaalaha, safarka waxbarasho ee K&Q ee Yugaandha wuxuu dhaliyey warbixin-barasho, heshiisyo iskaashi, iyo qorshe howleed lagu tayeynayo nidaamka qiimeynta qaranka. Sidoo kale, shir farsamo oo lala yeeshay JICA ayaa diiradda saaray shaqo-abuurka dhallinyarada iyo ganacsiga bulshada nugul. Dhanka maalgashiga, Wasiirka iyo Danjiraha Boqortooyada Sacuudiga waxay ka wada hadleen xoojinta maalgashiga, halka Wasaaraddu daah-furtay warbixinta lixaad ee "Fursadaha Maalgashi ee Adeegyada Mihnadleyda."

# FARRIINTA WASIIRKA



*Shacab weynaha Soomaaliyeed iyo bahwadaagteenna qaaliga ah, Bishan waxaan qaadnay tallaabooyin lagu xoojinayo in iskaashiga iyo maalgelinta la waafajiyo mudnaanta qaranka ee ku xusan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo Hiigsiga 2060. Shirka Wadajirka ah ee Dowladda iyo Qaramada Midoobay waxaan ku dejinnay jihada 2026– 2030–oo xoogga saaraysa maamul-wanaag, koboc dhaqaale, adeegyo bulsho, iyo u-adkeysiga cimilada.*

*Waxaan maalgelinaynaa nidaamyo keena natiijo. Soo bandhigista e-NIMIS iyo safarkii K&Q ee Yugaandha waxay astaan u yihiin qorsheyn iyo isla-xisaabtan ku dhisan caddayn. Sidoo kale, dhallinyarada iyo shaqo-abuurka ayaa mudnaantayada ka mid ah–wada-shaqeynta JICA iyo kobcinta maalgashi gaar ahaan adeegyada mihnadleyda waxay fure u yihiin horumar waara.*

*Hagitaankeennu waa mid mideysan: helitaan maalgelin caddaalad ah, xoojinta hay'adaha, iyo abuuridda fursado u wada-siman muwaadiniinta oo dhan. Waxaan u mahadcelinayaa shacabka, shaqaalaha dowladda, iyo saaxiibada horumarinta; waxaanan idin ku boorrinayaa inaad sii adkeysaan howlaha la jaanqaadaya NTP si loo gaaro Soomaaliya adkaysi iyo barwaaqo leh.*

***Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene)***
*Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha*

## WADATASHIGA DIYAARINTA ISTARAATIIJIYADDA HAY'ADA SAVE THE CHILDREN EE 2025 – 2027




**Muqdisho, 28-ka Luulyo 2025** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi ah oo lagu gorfeynayay Istiraatiijiyadda Hay'adda Save the Children ee Soomaaliya (2025–2027).

Kulankan ayaa si qoto dheer loogu falanqeeyay sidii qorshaha cusub ee hay'addu ula jaanqaadi lahaa Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), loona hubin lahaa inuu ka tarjumayo baahiyaha dhabta ah ee dalka ka jira, gaar ahaan dhinacyada carruurta, waxbarashada, ilaalinta bulshada, iyo horumarinta adeegyada muhiimka ah. Kulanka waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee

Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire, waxaana ka soo qeybgalay Agaasimayaal Guud oo ka kala socday hay'adaha dowladda Federaalka, Agaasimayaal Waaxeedyo kala duwan oo wasaaradda ah, iyo wakiillo ka socday Hay'adda Save the Children.

## WASIIRKA QORSHEYNTA OO LA KULMAY DANJIRAHA BOQORTOOYADA SACUUDI CARABIYA EE SOOMAALIYA



**Muqdisho, 28 Luulyo 2025** – Wasiirka

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud Cyad Sheekh Faarax (Beenebeene) magaalada Muqdisho ku qaabilay Danjiraha Boqortooyada Sacuudi Carabiya u fadhiya Soomaaliya, Mudane Axmed bin Maxamed Al-Mawlid.

Kulanka ayaa looga hadlay kor u qaadista iskaashiga horumarineed ee labada dal, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaray sidii deeqaha Sacuudiga ay ula jaanqaadi lahaayeen Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029). Labada mas'uul waxay sidoo kale isla meel dhigeen muhiimadda ay leedahay dhiirrigelinta maalgashiga Sacuudiga ee Soomaaliya, maadaama ay kordhay xiisaha maalgeliyeyaasha Sacuudiga.

Wasiirka ayaa caddeeyay in Wasaaraddu u heellan tahay fududeynta fursadahaas si loo horumariyo iskaashiga laba geesoodka ah. Sidoo kale, wuxuu uga mahadceliyay Boqortooyada Sacuudiga taageerada joogtada ah ee ay la garab taagan tahay Soomaaliya.

# WAAXDA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA EE WASAARADDA QORSHEYNTA OO SOO GABAGABEYSAY SAFAR WAXBARASHO OO KU SAABSANAA DHISMAHA NIDAAMKA QIIMEYNTA QARANKA



**Kampala, 26 Luulyo 2025 –** Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Soomaaliya ayaa soo gabagabeysay safar shaqo oo shan maalmood socday, kaasoo ay ku tageen magaalada Kampala ee dalka Yugaandha. Ujeedada safarku waxay ahayd sidii loo kororsan lahaa aqoon iyo khibrad ku saabsan dhismaha iyo hirgelinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada horumarineed.

Safarkan, oo dhacay intii u dhaxeysay 21–25 Luulyo 2025, ayaa diiradda lagu saaray aqoon is-weydaarsi khibradeed iyo lafa-gur ku saabsan nidaamka qiimeynta ee Yugaandha, oo loo aqoonsan yahay mid horumarsan, hufan, isla markaana qeyb ka noqday qaab-dhismeedka dowliga ah. Waxaa si gaar ah loo bartay doorka muhiimka ah ee Ururka Qiimeeyayaasha Yugaandha (Uganda Evaluation Association – UEA), oo si weyn loogu qadariyo doorkiisa ku aaddan horumarinta siyaasadda qiimeynta, tayeynta xirfadaha qiimeeyayaasha, iyo kor u qaadista dhaqanka ku saleysan caddayn iyo isla xisaabtan.

Intii lagu jiray safarka, wafdiga Wasaaradda Qorsheynta ayaa kulammo miro-dhal ah la yeeshay hay'adaha kala ah: Xafiiska Madaxweynaha Yugaandha, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Wasaaradda Maaliyadda, Hay'adda Qorsheynta Qaranka, Ururka Qiimeeyayaasha Yugaandha (UEA) iyo Machadka Maamulka ee Yugaandha (Uganda Management Institute).

Mas'uuliyiinta Waaxda K&Q ayaa fursad u helay in ay si toos ah u arkaan hababka shaqo ee hay'adahaasi, gaar ahaan sida ay u hirgeliyaan qiimeyn tayo leh oo salka ku haysa horumar waara, qorsheynta qaranka, iyo la-socodka waxqabadka dowladda.

Safarkan waxbarasho wuxuu horseeday: Warbixin waxbarasho oo dhameystiran oo ka hadlaysa hab-dhaqanka qiimeynta ee Yugaandha, Talooyin iyo aragtiyo lagu dhisayo Ururka Qiimeeyayaasha Qaranka ee Soomaaliya, Heshiisyo iskaashi oo ay gaareen Waaxda K&Q iyo UEA si loo xoojiyo khibrad-wadaagga iyo tababarrada iyo Qorshe howleed lagu taageerayo tayeynta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta Soomaaliya.

Wasaaradda Qorsheynta waxay u aragtaa safarkan inuu yahay tallaabo muhiim ah oo ka mid ah dadaallada lagu xoojinayo hay'adaha dowliga ah iyo dhismaha nidaam qiimeyn qaran oo waara, kaasoo sal u noqon kara qorsheynta horumarineed ee dalka. Sidoo kale, safarkan wuxuu xoojinayaa iskaashiga gobolka iyo doorka Soomaaliya ee ku aaddan fulinta Ajendaha 2063 ee Midowga Afrika.


## SHIR FARSAMO OO LAGU DARDAR-GELINAYO SHAQO-ABUURKA DHALLINYARADA



**Muqdisho, 23-ka Luulyo 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha oo kaashaneysa Hay'adda Iskaashiga Caalamiga ee Dowladda Japan (JICA) ayaa magaalada Nairobi kusoo gabagabeysay shir farsamo oo socday laba maalmood, kaa oo diiradda lagu saaray shaqo-abuurka iyo kobcinta ganacsiga dhallinyarada iyo bulshada nugul.

Shirkan waxaa sidoo kale ka qeyb galay Wasaaradaha Ganacsiga & Warshadaha iyo Shaqada & Arrimaha Bulshada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya. Intii uu socday waxaa dib loogu milicsaday horumarka laga gaaray barnaamijyada hore, iyadoo sidoo kalena la xoojiyay qorshayaasha ku aaddan horumarinta awoodda hay'adaha iyo kobcinta tayada adeegyada.

## SOMINVEST IYO DANJIRAHA SACUUDIGA OO KA WADA HADLAY XOOJINTA MAALGASHIGA



**Muqdisho, 23-ka Luulyo 2025 -** Agaasimaha Xafiiska Maalgashiga Dhiirigelinta (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Dubo ayaa kulan la yeeshay Danjiraha Boqortooyada Sacuudi Carabiya ee Soomaaliya, Danjire Ahmed bin Mohammed Al-Mawlid.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta xiriirka maalgashi ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Boqortooyada Sacuudiga, iyada oo sidoo kale laga wadahadlay qodobbada istiraatiijiga ah ee lagu horumarin karo iskaashiga labada dal, gaar ahaan dhinacyada horumarinta dhaqaalaha iyo fududeynta maalgelinta tooska ah.

Danjire Ahmed bin Mohammed Al-Mawlid ayaa muujiyay xiisaha sii kordhaya ee shirkadaha Sacuudiga ay u qabaan suuqyada maalgashi ee Soomaaliya, isagoo carabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la helo hannaan u fududeeya shirkadahaas inay si hufan uga hawlgalaan gudaha dalka.

## WASAARADDA QORSHEYNTA IYO JAAMACADAHA OO KA WADA HADLAY MANHAJKA QIIMEYNTA



**Muqdisho, 17-ka Luulyo 2025** - Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa kulan wadatashi ah la qaadatay masuuliyiin ka kala socday Jaamacadda SIMAD, Jaamacadda Ummadda, iyo Jaamacadda Muqdisho, si ay uga talo-bixiyaan manhajka Qiimeynta Qaranka ee ay waaxdu diyaarinayso.

Masuuliyiinta jaamacadaha ayaa la wadaagay waaxda talooyin wax ku ool ah oo la xiriira horumarinta manhajka iyo hababka ugu habboon ee maamulka iyo hirgelintiisa. Waxaa sidoo kale laga dooday sidii manhajkaas loogu faafin lahaa bahda waxbarashada dalka si loo xaqiijiyo faham qoto dheer iyo ka-qaybgal firfircoon.

## WASAARADDA QORSHEYNTA OO MARTIGELISAY SHIRKA SADDEX-BILOODLAHA EE GUDDI-HOOSAADKA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA TIIRKA HORUMARINTA ARRIMAHA BULSHADA



**Muqdisho – 16 Luulyo 2025** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, gaar ahaan Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, ayaa martigelisay Shirka Saddex-biloodlaha ee Guddi-hoosaadka Kormeerka iyo Qiimeynta Tiirka Horumarinta Arrimaha Bulshada.

**Shirkan oo ay kasoo qaybgaleen wakiillo ka kala socday wasaaradaha Federaalka ee hoos yimaada Tiirka Horumarinta Arrimaha Bulshada ayaa diiradda lagu saaray xoojinta wadashaqeynta hay'adaha dowladda, Qaramada Midoobay iyo bahwadaagta caalamiga ah ee ka shaqeeya horumarinta arrimaha bulshada.**

Kusimaha Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, Mudane Jibriil Jaamac Rafle, ayaa furitaanka shirka ka jeediyay khudbad uu kaga hadlay muhiimadda shaqada guddigan, isagoo xusay in la-socodka iyo qiimeynta qorshe-howleedka hay'adaha uu yahay tiir-dhexaad lagu xaqiijin karo wax-ku-oolnimada barnaamijyada horumarineed.

Intii uu socday shirka, waxaa si gaar ah loogu falanqeeyay dardargelinta kormeerka iyo qiimeynta Qorshe-howleedka 2025, waxaana si rasmi ah loo soo bandhigay Nidaamka Danabaysan ee Kormeerka iyo Qiimeynta ee e-NIMIS, kaas oo ah aalad casri ah oo lagu horumarinayo xog-ururinta iyo dabagalka waxqabadka.

Ugu dambeyn, shirka waxaa si rasmi ah u soo xiray Kusimaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifitaax Cismaan Xasan (Gaandi), oo xusay muhiimadda ay leedahay in la mideeyo dadaallada hay'adaha dowladda si loo xaqiijiyo yoolalka horumarineed ee la hiigsanayo.

## DFS IYO QARAMADA MIDOOBAY OO KA WADA HADLAY JIHADA ISKAASHIGA 2026–2030



**Muqdisho – 15 Luulyo 2025** - Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay ayaa magaalada Muqdisho ku yeeshay kulanka sanadlaha ah ee Guddiga Sare ee Hogaaminta Wadajirka ah (JSC), si dib loogu eego hirgelinta Qorshaha Iskaashiga Qaramada Midoobay (2021–2025), looguna gogol xaaro iskaashiga sanadaha xiga.

Kulanka oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Isku-duwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa waxaa si rasmi ah u furay Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka, Mudane Saalax Axmed Jaamac, iyadoo si wadajir ah ay u shir-guddoomiyeen Wasiirka Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene) iyo Ku-xigeenka Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay, George Conway.

Kulanka waxaa lagu falanqeeyay natiijooyinka la gaaray barnaamijyada Qaramada Midoobay sannadkii 2024, qorshaha mudnaanta leh ee 2025, iyo talooyinka qiimeynta Qorshaha Iskaashiga. Waxaa sidoo kale si qoto dheer looga dooday jihada Qorshaha cusub ee 2026-2030, oo ay ka mid yihiin maamul wanaag, horumar dhaqaale, adeegyada bulshada, iyo u-adkeysiga cimilada.

Kulanku wuxuu kusoo dhammaaday is-afgarad lagu meel mariyay tallaabooyin lagu hormarinayo sanadka 2025, iyo ballanqaad ah in dib la isugu yimaado dhammaadka sanadka si loo qiimeeyo horumarka iyo wada-jirka istiraatiijiyadeed ee mustaqbalka.

## KULANKA TODOBAADLAHA EE WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA



**Muqdisho – 14 Luulyo 2025 –** Waxaa qabsoomay kulanka toddobaadlaha ah ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka waxaa Soomaaliya. Kulanka ayaa shir-guddoomiyay Wasiirka Wasaaradda, Mudane Xildhibaan Maxamuud Cabdiraxmaan Sheekh Faarax (Beenebeene), iyadoo ay ka soo qeybgaleen Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda, Mudane Maxamed Aadan Maxamed, Ku-simaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Isku-duwidda Deeqaha, Mudane Cabdifataax Cismaan Xasan (Gaandi), Agaasimayaasha waaxyaha kala duwan ee Wasaaradda (Qorsheynta, Kormeerka & Qiimeynta, Maalgashiga, Horumarinta Dhaqaalaha) iyo La-taliyayaal Sare.

Kulanka oo ka dhacay Xarunta Wasaaradda Qorsheynta ayaa diiradda lagu saaray diyaar-garowga Shirka Guddiga Wadajirka ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay (Government and UN Joint Steering Committee), kaas oo lagu wado inuu ka dhaco magaalada Muqdisho.

## KULANKA GUDDIGA SARE EE HAGIDDA SANDUUQA XASILLINTA SOOMAALIYA III (SSF III)



**Muqdisho, 8-a Luulyo 2025 –** Kusimaha Agaasimaha Guud ahna Agaasimaha Isku-duwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Abdifatah Gaandi, ayaa ka qayb-galay kulanka Guddiga Sare ee Hagidda Sanduuqa Xasillinta Soomaaliya III oo ka dhacay Muqdisho.

Kulanka, oo ay si wadajir ah u shir-guddoominayeen Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta, Mudane Cali Yuusuf Cali (Xoosh), Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Mudane Xasan Macallim Maxamuud Sheekh Cali iyo Danjire Charles King, Safiirka Boqortooyada Ingiriiska ee Soomaaliya, ayaa waxaa kale oo ka soo qayb-galay: Mudane Feysal Xuseen, Xoghaye-Joogtada Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka iyo Mudane Caydaruus Macallim Xasan, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Hogaanka Sanduuqa Xasillinta Soomaaliya (SSF). Guddigu wuxuu si buuxda u ansixiyay Qorshayaasha Sannadka 3-aad ee SSF III, kuwaas oo diiradda saaraya arimaha xasilinta siyaadda, xoojinta maamul-wanaagga, arimaha garsoorka iyo isu-duubnida bulshada. Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxaa ka go'an isku-duwidda deeqaha iyo dhisidda iskaashi miro-dhal ah oo lagu gaari karo xasillooni iyo horumar dhaqaale oo ay bulshada Soomaaliyeed oo dhan ka faa'iideysan doonaan.

## KULANKA GUDDIGA FARSAMADA EE JRP OO LAGU ADKEEYAY WADA-SHAQEYNTA IYO HORUMARKA BARNAAMIJKA



**Muqdisho, 8-da Luulyo 2025** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED) ayaa soo qabanqaabisay kulanka Guddiga Farsamada ee Barnaamijka Wadajirka Adkeysiga (JRP).

Kulanka, oo ay ka soo qeyb-galeen wasaaradaha hawl-fulinta barnaamijka iyo hay'adaha FAO, UNICEF iyo WFP, ayaa lagu falanqeeyay Qorshaha Shaqo ee lixda bilood ee ka haray 2025 ee JRP 2.0 ee ka socda Galmudug iyo Puntland.

Qodobadii kulanka diiradda lagu saaray waxaa ka mid ahaa: Xallinta caqabadaha taagan, Xoojinta wada-shaqeynta wasaaradaha iyo Mideynta mudnaanta si loo dardargeliyo dadaallada dhisidda adkeysiga bulshada.

Waxaa la isla gartay in si isku-duuban looga shaqeeyo horumarinta adkeysiga bulshada, lana hubiyo in barnaamijku ku socdo jidka saxda ah ee lagu gaarayo natiijooyin waara.

## KULAN WADATASHI OO U DHAXEEYAY DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA IYO BANGIGA ADDUUNKA



**Nairobi, 7-da Luulyo 2025-** La-taliyaha Sare ee Siyaasadda ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED), Mudane Maxamed Macalim, ayaa ka qeyb-galay kulan wadatashi labo maalmood socday oo u dhexeeyay Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Bangiga Adduunka, oo ka dhacay magaalada Nairobi.

Wadatashigan ayaa diiradda saaray diyaarinta Warbixinta Isbeddelka Cimilada & Horumarka Dalka (CCDR) – tii ugu horraysay ee Soomaaliya.

Ujeeddadu waxay ahayd in warbixintu si buuxda uga tarjunto xaqiiqooyinka isbeddelka cimilada iyo himilooyinka horumarineed ee dalka, iyadoo la xaqiijinayo in talooyinka CCDR-gu ay kor u qaadaan koboc cagaaran, adkeysiga bulshooyinka Soomaaliyeed, iyo dadaallada lagu yareynayo nuglaanta iyo barakaca ka dhasha saameynta isbeddelka cimilada, gaar ahaan deegaanada miyiga.

## WARBIXINTA LIXAAD EE FURSADAHA MAALGASHI OO SI RASMI AH LOO DAAHFURAY



**Muqdisho, 6-da Luulyo 2025 -** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa si rasmi ah u daah-furay Warbixintii Lixaad ee Qeybaha Dhaqaale ee Mudnaanta Maalgashiga u leh Xukuumadda Federaalka ah ee cinwaankeedu yahay "Fursadaha Maalgashi ee Adeegyada Mihnedleyaasha Soomaaliya."

Warbixintan, oo ay diyaarisay Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda, waxa ay qayb ka tahay dadaallada joogtada ah ee lagu baarayo qaybaha dhaqaale ee mudnaanta leh, si waafaqsan Istiraatiijiyadda Qaran ee Dhiirrigellinta Maalgashiga (2021–2025). Wasiirku waxa uu dadweynaha, ganacsatada iyo daneeyayaasha kale ku boorrinayq in ay warbixinta daraasaddan ay akhristaan si wax-ku-ool ah uga faa'iidaystaan.

## WASIIRKA QORSHEYNTA OO KA QAYBGALAYA SHIRKA 4AAD EE CAALAMIGA AH EE MAALGELINTA HORUMARINTA



**Muqdisho, 2-da Luulyo 2025 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud Cabdi Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa ka mid ah wafdiga uu hoggaaminayo Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Soomaaliya, Mudane Saalax Axmed Jaamac, ee ka qaybgalaya Shirka 4aad ee Caalamiga ee Maalgelinta Horumarinta ka socda magaalada Seville ee dalka Spain.

Shirkan oo tobankii sanaba mar la qabto ayaa waxaa aalaaba isugu yimaada madaxda caalamka iyo daneeyayaasha horumarineed si looga doodo dib-u-habeynta iyo xoojinta nidaamka maalgelinta horumarinta, iyadoo la doonayo in la helo hannaan cadaalad iyo sinnaani ku dhisan oo u saamaxaaya dalalka nugul inay helaan maalgelin waarta, oo la awoodi karo. Inta uu shirku socdo, Wasiir Beenebeene ayaa xoogga saarayaa muhiimadda lagu waafajinayo maalgelinta horumarineed mudnaanta qaran ee Soomaaliya, iyadoo la adeegsanayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo Hiigsiga Qaranka 2060, kuwaas oo hagaya himilada Soomaaliya ee koboc waara, nabad iyo horumar loo dhan yahay. Sidoo kale, Wasiirka ayaa kulammo gaar gaar ah la qaatay madaxda ka socotay wadamada kale iyo hay'adaha caalamiga ah ee ka qaybgalaya shirka, si loo xoojiyo iskaashiga iyo wada-shaqeynta lagu gaari karo ujeeddooyinka horumarineed ee Soomaaliya.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay mar kale adkeyneysaa sida ay uga go'an tahay hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka iyo Hiigsiga Qaranka 2060, iyadoo lala kaashanayo saaxiibada horumarineed iyo kuwa caalamiga ah.


WASAARADDA QORSHEYNTA
وزارة التخطيط
MINISTRY OF PLANNING



MoPIED